

## **Somali A: literature – Standard level – Paper 1**

## **Somali A : littérature – Niveau moyen – Épreuve 1**

## **Somalí A: literatura – Nivel medio – Prueba 1**

Wednesday 4 May 2016 (afternoon)

Mercredi 4 mai 2016 (après-midi)

Miércoles 4 de mayo de 2016 (tarde)

1 hour 30 minutes / 1 heure 30 minutes / 1 hora 30 minutos

---

### **Instructions to candidates**

- Do not open this examination paper until instructed to do so.
- Write a guided literary analysis on one passage only. In your answer you must address both of the guiding questions provided.
- The maximum mark for this examination paper is **[20 marks]**.

### **Instructions destinées aux candidats**

- N'ouvrez pas cette épreuve avant d'y être autorisé(e).
- Rédigez une analyse littéraire dirigée d'un seul des passages. Les deux questions d'orientation fournies doivent être traitées dans votre réponse.
- Le nombre maximum de points pour cette épreuve d'examen est de **[20 points]**.

### **Instrucciones para los alumnos**

- No abra esta prueba hasta que se lo autoricen.
- Escriba un análisis literario guiado sobre un solo pasaje. Debe abordar las dos preguntas de orientación en su respuesta.
- La puntuación máxima para esta prueba de examen es **[20 puntos]**.

Ka qor **mid ka mid ah** qoraallada soo socda faallo suugaaneed ku salaysan labada su'aalood oo ka dambeeya qaybtaaad u xulatay. Jawaabtaadu waa inay la xiriirta labada su'aalood oo qaybtaaad u xulatay ka dambeeya.

## 1.

Raage waa toban jir, caata ah, da'diisa aad ugu dheer. Indhahiisa iyo wejigiisa waxaa ka muuqda fariidnimo uu u dhashay iyo firfircooni. Hadalka wuu ku cad-cad yahay mana jecla in inammada faciisa ahi ay sina uga roonaadaan ama uga reeyaan. Yuhuun wanaagsan – qaddar kibir ahi ka marnayn – ayuu ku barbaaray.

- 5        Sannad ka hor ayaa adeerkii Cadan (Yaman) keenay oo korriinkiisa isu xil saaray. Dugsiga Baasarca ee Cadan ku yaal ayaa fasalka saddexaad ee tacliinta hoose lagu daray. Dugsiga Baasarca waa dugsi-hoosaadka Cadan ugu magac iyo maqaam weynaa xilligaas. Maamul ahaan iyo tacliin ahaanba heerkiiisa sare ayaa la is la wada qirsanaa oo looga marag kacay. Akhyaarkii la oran jirey Baasarca ee dugsigaas isaga lagu magacaabo dhisay,
- 10      waqfi iyo samafal ayuu ugu talo galay. Ardayda inta awoodi kartana kharash yar ayaa laga qaadi jirey, dan-yartana lacag la'aan ayey wax ku baran jireen. Dugsigu waddada Cadan-weyn ugu caansan ayuu saaran yahay. Mudiirkka dugsiga ee Baaxamiish ee waxbarashada iyo maamulka guud ee dugsiga u xil saaran waxaa lagu wada yaqaan sida uu hoggaaminta iyo nidaamka ugu adag yahay.
- 15      Sannadkii waxbarashada ayaa durba dhaqso isu guray. Imtixaankii kala guurka ee fasallada cusub loo guurayey ayaa laga soo jeestey. Maalintii natijadaha la isa siinayey ayaa isa soo giringirisay oo is-keentay.  
Raage dhinaca waxbarashada dadaal kuma yarayn oo mar walba wuu ka hadli jirey siduu fasalkiisa uga dhix muuqdo. Qiyaastii lambarka kowaad ayuu meel sii dhigtay. Dhawr
- 20      saaxiibbadiis ah oo ay isku da' dhow yihiin wuu wargeliyey inay timi maalintii imtixaanka lagu kala baxayey...kana codsaday inay dugsiga u raacaan munaasabaddaas darteed. Raage in si fiican loo gelbiyo ayey isu diyaarsheen. Raage wuxuu u soo qoordiitey in uu sannadka afraad ee dugsi hoosaadka ugu dambeeya, isagoo tanaadaya oo fasalkiisa calanka u sida u gudbo. Maalintaas boqrان wuu u soo labbistay. Shaati cad oo bafta ah iyo surwaal kaaki daba-gaab ah
- 25      oo kaawiyad lagu jiq siiyey iyo kabo saan ah oo marka waddada laamiga lagu marayo jiq-jiqdooda, si door ah, loo maqli karo ayuu soo xirtay. Saaxiibbadiis way soo garabgaleen si ay munaasabaddaas uga tiiriyaan, farxaddana u la wadaagaan. Qado gaar ah iyo damaashaadkii loogu hambalyayn lahaa, marka dugsiga laga soo rogaal celiyo, way sii ballamiyeen. Raage inay kedis uga dhigaan ayey ku tala galeen oo lama ay socodsiin.
- 30      Tobankii subaxnimo ayey ardaydii dugsiga Baasarca iyo macallimiintoodii koox waliba fasalkoodii is hor safeen markii ay dawanka maqleen. Waa saacaddii la wada dhawrayey ee arday waliba ayaankii iyo halkuu natijadaha ka galay la sugayey.  
Raage haba yaraatee kama qasna. Natijadiisa wuu ku kalsoon yahay siduu saaxiibbadiiba ugu warramay. Wejigiisa farxad iyo rayrayn ayaa ka muuqata. Ardayda ay isku
- 35      fasalka yihiin oo Yamantu u badan tahay, kama uu da' weyna ee wuu ka wada dheer yahay oo si roon, ayuu uga dhix muuqdada. Saaxiibbadiis barbarkiisa ayey taagan yihiin. Iyaga laftoodu waxay u eg yihiin qaar imtixaankoodii ka dhur sugaya. Yeeristii lambarrada la kala galay ayaa la soo gaarey. Shib ayaa la wada yiri. Macallinkii oo miis joog dheer daba taagan natijadihiina hor yaallin ayaa bilaabay magac-wiciddii iyo sidii loo kala guuleystay:
- 40      Kan kowaad: Wil Yamani ah ayaa loo yeeray. "Kaas waan filayey oo tartan kulul ayaa naga dhexeeyey," ayaa Raage saaxiibbadiis ku yiri, isagoo lambarka ku xiga iska iimaansanaya. Kan labaad: Yamani kale ayaa loo yeeray. "Kan laftiisu dab yar ma shidayn ee siduu ii dhaafay ma garan karo" ayuu Raage saaxiibbadiis u sheegay.  
Kan saddexaad: Ku kaloo isna Yamani ah ayaa la wacay. "Kolleyba waxbaa si ah!"

45 Macallinka eex kuma aan ogeyn ee wax baa si ah,” ayaa Raage la socodsiiyey saaxiibbadiisa yaaban.

Kan afraad: Arday kale ayuu noqday. “Malaa magacaygii ayuu macallinku la’yahay, intaasi ima wada dhaafi kareene! Haddaan kan kowaad waayo, kan labaad waan isku hubey.

50 Ar maa gadaal wax laga saxi doonaa” ayuu cod taag-taagan oo markan kalsoonidii ka yar shuuqsantay Raage ku sawaxay.

Siciid Jaamac Xuseen, “*Imtixaan*”, *Shufbeel: Tiraab Soomaaliyeed* (2011)

- (a) Ka faallood shakhsiyadda Raage iyo dawrkiisa.
- (b) Maxaad ka sheegi kartaa kaalinta iyo qaayaha tilmaamidda wixii dhacay ee qaybtani?

Turn over / Tournez la page / Véasse al dorso

2.

**GAAJO SEE KU HARI?**

Lama horaankii oo, hooyooynaannu nahay  
Hiddaha iyo dhaqanka lagu soo, hirtaannu nahay  
Haddaannan u horseedin ilmaheenna, meel la hubo  
War waan idin haybiyee, gaajo see ku hari?

- 5 Hurdaa na dishee haddaan, hirradii la kicin  
Dhididku naga hoorin gacmeheenna, haaro korin  
War waan idin haybiyee, gaajo see ku hari?

- 10 Ciiddu waa hodane hoosteeda, waxa ku jira  
Ha laga haagee haddaan, waana la hubsanayn  
War waan idin haybiyee, gaajo see ku hari?

Hoodaalow calanku hiil buu u baahan yahay  
Haddaan cadowga handadaayoo dhan, laga horayn  
War waan idin haybiyee, gaajo see ku hari?

- 15 Hudhudka beenlowga Shaydaanku, u hargo lulay  
War yaa reer habeleheey kii, hunguri ku raba  
Ilmo aan soo hayn iyo hoor, indhaha ka tira  
Haddaan hadalkiisa raacnood, aan laga hortegin  
War waan idin haybiyee, gaajo see ku hari?

Xaawa Jibriil, *Saa Waxay Tiri: Maansadii iyo Waayihii Xaawa Jibriil* (2008)

- (a) Wax ka qor oo qeex dulucda buruamburkan.  
(b) Maxay yihiin dareenka iyo shucuurta ama dareemaha buruamburku kugu dhaliyo sidee baana afka buruamburku adeegsaday qayb uga qaataa arrintaas?
-